

Warbixinta arrimaha Bani'aadamnimada SOOMAALIYA

1 Nofeembar – 4 Diseembar 2018

QODOBBADA

- *Roobka Deyrta si wanaagsan ugama di'in dalka*
- In ka badan 4.2 milyan oo dad ah ayaa kaalmo u baahnaan doona 2019.
- Lughaye, lix bilood duufaantii Sagar kadib.
- Haweeney barakacday oo isku filnaan ku hammineysa.
- Deequhu waa lagama maarmaan si loo yareeyo baahiyaha.

TIRADA

# Dadka tabaaleysan	4.6m
# Dadka ku jira xaaladaha degdegga ah ee bini'aadamnimo heerarka 3aad iyo 4aad (IPC Phases 3 &4)	1.5m
# Dadka ku jira xaaladaha degdegga ah ee heerka 4aad (IPC Phase 4) 0.2m	
# caruurta la qiyaasayo iney nafaqa darro heyo	1.2m
# Dadka gudaha ku barakacay ilaa Nofeembar 2016 abaarta awgeed	1.6m
# Dadka ku nool xaalad barakac daba dheeraatay	1.1m

DEEQAHA

\$1.5 BILYAN

Dalabka qorshaha ka falcelinta baahiyaha bini'aadamnimada ee HRP

\$840.3 MILYAN

Wadarta dhaqaalaha loo helay mashruuca HRP ee 2018

(Source <http://fts.unocha.org>, 30 November 2018)



DRC waxa caawisaa dumarka ku jira xeryaha barakacayaasha si ay u bilaabaan ganacsi ay noloshooda ku maareeyaan. (Photo: DRC)

Roobka Deyrta si wanaagsan ugama di'in dalka.

Roobka la helay ilaa hadda wuu hooseeyaa

Roobka Deyrta ee la helay ilaa hadda ma ahan mid wanaagsan, si ka duwan sidii horay loo saadaaliyay. Gobollada Waqooyi Bari ayaa ka mid ah meelaha roob-yarida ay aad u saameysay. Hay'adaha samafalka waxay soo werinayaan in qaar kamid ah xoolo dhaqatada Puntland gaar ahaan gobolka Bari ay bilaabeen iney hayaamaan biyi-yari jirta awgeed. Dhulka waxaa horay u saameeyay abaarihii horay u dhacay iyo duufaantii Sagar. Hay'adda Puntland u qaabilsan gargaarka bani'aadamnimada iyo maareynta musiibooyinka ee (HADMA) waxay codsatay gurmada kahor inta aan xaaladdu faraha ka bixin.

Roobkii la helay labadii todobaad ee ugu horreysay Nofeembar wuxuu ahaa mid hooseeya sida ay sheegtay hay'adda FAO qaybteeda qaabilsan warbixinnada la xiriira dhulka iyo biyaha. Puntland, wax roob ah lama helin inta badan gobollada Bari, Nugaal iyo waqooyiga Mudug. Roob cuuf ah ayay heleen deegaanno aan badneyn oo hoostaga degmada Gaalkacyo ee gobolka Mudug. Dhanka koofurta waxaa ka jira roob yari baahsan sidoo kale.

Roob dhexdhexaad ah ayaa ka da'ay dhulka xoolo dhaqadka ku wanaagsan ee Juba iyo dhulka xoolo dhaqata-beeraleyda u fiican ee labada Shabeelle.

Aragti Hordhac ah

Daraasadda hordhaca ah ee ay FSNAU iyo FEWSNET ay ka sameeyeen xilli roobaadka Deyr-ta ee 2018 waxay sheegtay in roob-yari baahsan iyo cayayaan ku habsaday meelo badan ay u badantahay inuu saameyn aan wanaagsaneyn ku yeesho dalagii la filayay. Wax soo saarka inta badan koofurta Soomaaliya waxaa la saadaalinayaa inuu noqdo boqolkiiba 60-70 laakiin gobollada Waqooyi waxaa la filayaa wax soo saar intaas aad uga hooseeya, gaar ahaan dhulka xoolo-dhaqato beeraleyda. Si kastaba ha ahaatee, beeraha galleyda ee lagu waraabiyo matoorrada waxaa kasoo bixi doono dalag caadi ah. Wixii ka


Nuqulkan waxaa ku jira

[Warbixinta roobka Deyrta](#) P.1

[Warbixinta HNO](#) P.2

[Warbixinta Gurmada](#) P.3

[Humanitarian funding update](#) P.5



haray dalaggii xilli-roobaadka Gu-ga oo ay wehliso dalaggii la helay Deyrta iyo taranka iyo ka ganacsiga xoolaha oo si caadi ah ku socda waxaa la filayaa inay hoos u riddo heerarka 1aad iyo 2aad (IPC1 iyo IPC2) ee inta badan gobollada koofurta, laakiin gobollada Bay iyo Bakool ayaa laga cabsi qabaa in xaaladdoodu ay kasii darto oo ay gaarto cunta-yari heerka sadexaad ah ee cunta-yarida markii la gaaro Febraayo 2019.

Inta badan dhulka xoolo dhaqato-beeraleyda, dalagga beeraha ee xilli roobaadka Deyrta wuxuuba hallaabay marxilidihii hore ee uu biqilka ku jiray, sidaas darteed waxaa laga cabsi qabaa in digirta soo go'i doontaa ay ka yaraa doonto celceliskii la heli jiray. FSNAU iyo Wasaaradda Beeraha ee Somaliland waxay sheegayaan in dalagga laga filayo dhulka xoolo dhaqadka iyo beeraleyda u wanaagsan ee Waqooyi Galbeed uu 78% ka hoosey doono markii loo eego todobadii sano ee lasoo dhaafay. Tani waxay ka hooseysaa sidii la filaayay waxaana loo sababeynayaa roobka deyrta oo aad u yaraa, heerkulka oo aad u sarreeyay iyo haadda waxyeesha dalagga oo soo badatay.


Daaqa iyo biyaha ayaa ku yar gobollada bartamaha iyo waqooyiga bari ee dalka. Taranka xooluhu wuxuu ahaa mid dhexdhexaad ah, lkn waxaa laga cabsanayaa in ubadka yaryar ay noqon waayaan kuwa kasoo baxa xilli jiilaaka soo socda. Muuqaalka xoolaha, caanaha laga helo xoolaha iyo qiimahoodaba waxaa laga yaabaa inuu hoos u dhac ku yimaado. Iyadoo maanka lugu hayo heysashada xoolaha ee reer miyiga oo ah mid leysku halayn karo iyo faqriga qoysaska reer guuraaha ah oo aan lahayn ilo dhaqaale oo dakhli kasoo galo, hoos u dhac dhanka nolosha ah ayaa la saadaalinayaa Abriil 2019.

Bishii Nofeembar, suuqyada badarku waxay ahaayeen kuwa camiran dalaggii soo go'ay bilihii Sebteembar iyo Oktoobar awgood iyo weliba haraagii dalaggii Gu-ga. Bishii Oktoobar ee 2018, qiimaha masaggada iyo galeydu wuxuu 42% ka hooseeyay celceliskii shanti sano ee lasoo dhaafay, 52% na wuxuu ka hooseeyay markii loo eego Oktoobar 2017 inta badan suuqyada koofurta Soomaaliya. Waxaa la saadaalinayaa in qiimaha guud ahaan raashinka gudaha ka soo go'a uu ahaan doono mid hooseeya sababo la xiriira badarkii soo go'ay xilli roobaadka Gu-ga oo weli yaalla suuqyada inta laga gaarayo Abriil 2019. Tani waxay kabi doontaa gaabiska ku yimid dalaggii la filaayay xilli-roobaadka deyrta.

Kaalmada bani'aadamnimadu waxay gundhig u ahayd ka hortagga xaaladda cunto yarida ee meelo badan, gaar ahaan meelaha hantidii/ xoolihii dadka ay baabi'isay abaar daba dheeraatay. Hay'adaha ka shaqeeya gargaarka cuntada waxay celcelis ahaan gargaar cunto gaarsiinayeen laba milyan oo dad ah bishiiba intii u dhexeysay Luulyo ilaa Sebteembar. Inta badan dadkani waxay helayeen kaalmo lacageed (kaash) oo ay cunto ku iibsadaan. Bishii Sebteembar, waxaa gargaar la gaarsiiyay tiradii ugu badneyd sannadkan oo ah 2.1 milyan oo dad ah.


4.2 milyan oo dad ah ayaa kaalmo u baahnaan doona 2019

In ka badan 4.2 milyan oo soomaali ah, sadex meelood oo dalool tirade dadka Soomaaliyeed waxay u baahnaan doonaan kaalmo bani'aadamnimo iyo adeegyada daryeelka 2019 sida lagu sheegay. Sida lagu sheegay qorshaha baahiyaha bani'aadamnimada HNO ee 2018, tirade dadka tabaaleysan ee Soomaaliya wuxuu hoos u dhacay 34%, 2018 waxay ahayd tiradu 6.2 milyan halka 2019 ay tiradu hoos ugu dhacday 4.2 milyan oo qof.



Sadex meelood oo laba dadka tabaaleysan waa caruur halka 60% ama 2.6 milyan oo dad ah ay barakacayaal yihiin, kuwaas oo ku nool duruufo adag una baahan adeegyada aasaasiga ah. Qoysaska agoonta ah, caruurta, duqeyda iyo dadka naafada ah waxay mar walba wajahayaan qataro keeni kara in lagu xadgudbo.

Hoos u dhaca waxaa sabab u ah sadex arrimood. Ugu horreyn, Deyrtii 2017 waxay u da'day si ka wanaagsan sidii la filaayay, waxaa ku xigsaday roobkii Gu-ga oo u da'ay si ka wanaagsan intii la qiyaasay, labadan arrimood waxay keeneen horumar baaxad leh in laga sameeyo arrimaha bani'aadamnimada. Tan labaad, hoos u dahca waxaa qayb ka ah qaabka loo qeexayay baahida bani'aadamnimada oo wax laga bedelay oo hadda lugu daray dadka ku jira xaaladaha degdegga ah heerka 2aad (IPC2). Iyo tan ugu danbeysa oo ah in xisaab ahaan dadka tabaaleysan lugu jaangooyey nuglaanta iyadoo diiradda la saarayo tirada dad ee ku nool goob cayiman oo laysla ogyahay. Waxaa laga guurayaa qaabkii tirada dadka tabaaleysan kaliya laga qaadan jiray daraasadaha FSNAU-da baahiyahana ay saameyn ku yeelan jireen isbedellada cimilada iyo baahiyaha nafaqo iyo cunto ee jiri kara.



Qorshaha lagu qiimeynayo baahiyaha bani'aadamnimada ee HNO wuxuu ka jawaabayaa fahamka guud ee baahiyaha bani'aadamnimada wuxuuna ka dhashay dodo ballaaran oo ay lagalay heer dowlad dhexe, heer dowlad goboleed, heer gobol iyadoo weliba ay ka qayb qaateen bulshooyinka danyarta ah. Tani waxay dhiirrigelineysaa qorshe wadajir ah oo looga jawaabay baahiyaha bani'aadamnimada ee 2019 ee HRP. Qorshahani wuxuu ku saleysanyahay daraasado xaqaa'iq ku dhisan oo ay ku jirto daraasado ay wadajir u fuliyeen hay'ado badan. Hay'adaha gargaarku waxay muhiimad sii doonaan dadaallada naf-badbaadiska ah gaar ahaan dumarka, caruurta iyo raga tabaaleysan, waxayna ku barbar wedayaan in bulshado yeelato awood ay ugu gegaan karto afooyinka sannadka 2019. Hay'aduhu waxa kale oo ay sara u qaadayaan maalgashiga waqtigadhexe iyo kan fog ah ee lugu yareynayo qataraha uu keeno faqriga iyo nugeylka lagu kaabay horumarinta, sida Hanaanka kasoo kabashada nugeylka (RRF) iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) si loola tacaalo sababaha hoose ee ay ka dhashaan dhibaatooyinku.

Warbixinta Gurmada socda

Lughaye, lix bilood duufaantii kadib

Lix bilood ayaa laga joogaa markii duufaanta sagar ay ku dhifatay magaalada Lughaye ee Awdal ee Somaliland. Nolol maalmeedka ayaa tartiib tartiib usoo noqonaya. Lughaye waxaa deggan dad lugu qiyaasay 800 oo qoys oo badankood ay si uun u saameysay duufaantu. Six months after Sagar ravaged Lughaye in Somaliland's Awdal region, life is slowly returning to normal in the town where the cyclone made a landfall. Lughaye is home to an estimated 800 families, most of whom were affected by the cyclone. Meelo badan ayaa biyaha ka hoosmaray dadka deegaankuna waxay la mintidayeen iney hab nololeedkooda badbaadsadaan. Duufaantu waxay dhimasho iyo burbur baaxad lehba ka geysatay dhulka xeebta la dherersan ee Puntland iyo Somaliland.

322 arday ee dhiganaysay dugsiga hoose ee Lughaye ayaa wax waxbarasha la'aan ku dhacday

Dugsiga hoose ee Lughaye oo ahaa dugsiga kaliya ee magaalada ku yaallay wuxuu ka mid noqday kaabayaashii ay duufaantu dhulka la sintay. Ardaydii dhiganaysay dugsiga oo tiro ahaan gaareysay 322 arday (143 gabdhood iyo 179 wiil) waxaa ku dhacday wax barasho la'aan.



Ardayda oo fadhiga fasalka, markii dugsiga hoose ee Lughaya la dayactiray kadib

Maxamed Xasan Cali, maamulaha dugsiga, maanta aad ayuu u faraxsanyahay. Ardaydiisii dib ayay casharradii u bilaabeen. Wuxuu

bogaadinayaa hay'adihii soo gurmaday ee sida aan hagarta lahayn uga soo jawaabay baahiyahooda kuna guuleystay inuu dugsigu mar kale shaqeeyo. Hay'adaha gargaarku waxay waxay dayactireen dibna u hagaajiyeen kaabayaasha nolosha ee ay duufaantu burburisay oo ay kamid tahay tubbooyinkii biyaha gey jiray magaalada oo waxyeello soo gaartay. Rugta caafimaad ee kaliya ee magaalada ku taallay oo sidoo kale ku waxyeelowday duufaanta waa la howl geliyay waxayna hadda adeeg caafimaad u fidisaa dadka deegaanka.

Hay'adda U diyaargarowga-Garowga Aafooyinka iyo Kaydka Raashinka Qaranka ee Somaliland waxay sheegtay in 168,000 oo qof ay saameysay duufaantu. Degmooyinka dhibtu gaartay waxaa kamid ah Baki, Lughaye, Seylac iyo Berbera oo Waqooyi Galbeed ka tirsan. Dadka dhulkan ku nooli waxay ku tiirsanaayeen xoolaha nool.

Mudane Cabdullaahi, oo ah duqa magaalada Lughaye, wuxuu ku rajo weynyahay in dadka magaalada degani ay dib u dhisan doonaan hab nololeedkooda kana soo kaban doonaan wixii gaaray. Wuxuu ka codsaday hay'adaha ka shaqeeya mashaariicda horumarinta iney taageeraan kalluumeysiga. "Maadaama duufaantu ay baabi'isay xoolihii iyo dalaggii waa waqtigii saxda ahaa ee dadka lugu gacan siin lahaa iney kalluumeystaan" ayuu yiri.

Dowladda iyo hay'adaha samafalku waxay xoojiyeen u gurmashada dadka ay saameysay duufaantu. Hay'adaha gargaarku waxay wadeen gurmadyo kala duwan oo gacan lugu siinaayo dadka deegaanka. Hay'aduhu waxay cunto, xoolo nool, hooy ama gabbaad iyo adeegyada fayadhowrka la gaareen kumanaan qoys oo deggan gobollada Awdal Waqooyi Galbeed xilli ay aad ugu baahnaayeen. Si kasta oo ay ahaatoba dadkani waxay u baahan doonaan waqti iyo dhaqaale dheeraad ah si noloshoodii caadiga ahayd dib ugu helaan.

Dowladdu waxay ku dhiirri gelinaysaa in dadku ay xoogga saaraan kalluumeysiga.

Xiddigo waxay dukaan ku furatay \$500 oo deeq ah oo ay ka heshay DRC.

Haweeyney barakacday oo isku filnaan ku hammineysa.

Xiddigo Isaaq Aden ma aysan ka niyad jebin dhibaatooyinkii ay soo martay inay nolosheeda guul ka gaarto. Hooyadan 40 jirka ah waxay leedahay afar caruur ah iyada ayaana u shaqeysa. Dukaankeeda yarka ah eek u dhex yaalla xerada barakacayaasha ee Wadajir ee ku yaalla degmada Kaxda waxay ka leedahay rajo wanaagsan. Dukaankan yarka ah waxay ku furatay 500 oo doolar oo deeq ah oo ay ka heshay Hay'adda Qaxootiga ee Denmark. Waxay dareensantahay in dukaankeedu uu yahay mid kobcaya.



Hiddigo inside her small kiosk in the outskirts of Mogadishu


“Laga soo bilaabo markii aan furtay dukaanka waxaan ku filnaaday qoyskeyga, waxaan rajeynayaa inuu ganacsigeygu gaaro heer aan caawi karo dadka kale” ayay tiri Xiddigo oo ay ka muuqato rajo iyo yididiilo farxadeed. Si kastaba ha ahaatee Xiddigo waxay ka cabsaneysaa in laga saaro xerada barakac ee ay ku nooshahay. Laga soo bilaabo markii ay Muqdisho usoo guurtay 2011dii ugu yaraan afar jeer ayaa laga barakiciyay xeryo ay si kumeel gaar ah ugu nooleed. Barakicintan ay dhowrka jeer goobjoogga u ahayd waxay ku dhacday kadib markii dadka dhulka lahaa ay u baahdeen sababo la xiriira dhulka oo sicirkiisu sara u kacay.

Xiddigo oo ku nooleed duleedka magaalada Baydhabo waxay soo barakacday markii ay abaarta daran ku dhufatay Soomaaliya sannadkii 2011. Qoyska Xiddigo waxay xoolo ka qabeen 20 neef oo ari ah iyo 5 neef oo geel ah, xoolahan dhamaantood waxay ku baabe'een abaarta. Iney abaarta ku cayroobeen darteed ayay ahayd sababta ku kalliftay iney Muqdisho usoo barakacdo.

Markii ugu horreysay ee ay Xamar soo gashay waxay soo degtay xero barakac oo ku taallo degmada Hodan ee Muqdisho, intaas wixii ka danbeeyayna waxay ahayd qof marba meel u guureysa. Barabixinta dadka barakacayaasha cirka ayay isku sii shareereysay guud ahaan Soomaaliya. Sannadkan 2018 oo kaliya in ka badan 235,000 oo qof ayaa xoog looga saaray dhul gaar loo leeyahay oo ay degganaayeen. Tiro badan oo dadkan ka mid ah waxay usoo joogeen barabixinno dhowr ah oo is xigxigay. Markii dadka laga saaro xeryaha barakacayaasha waxay baylah u noqdaan qataro amni iyo xadgudub.

Deequhu waa lagama maarmaan si loo yareeyo baahiyaha

Dhamaadka
Nofeembar, wadarta
deeqda
bini'aadamnimada
Soomaaliya ee la
helay waa \$1.1 bilyan



Qaaraanka deeq bixiyaasha ay ugu talo galeen arrimaha bani'aadamnimada ee Soomaaliya waxay sababtay in baahiyaha jiray la yareeyo. Dhamaadka bisha Nofeembar, wadarta guud ee lacagta la helay waxay noqotay 1.1 bilyan oo doolar. Qorshaha ka falcelinta baahiyaha bani'aadamnimada ee Soomaaliya wuxuu helay kala bar ka badan lacagtii uu codsaday waxayna hadda taagantahay deeqda bani'aadamnimada ee la helay 839 milyan oo doolar.

Si kastaba ha ahaatee waxaa jira farqi u dhexeeyahay codsigii dhaqaale ee ay dalbadeen qaybaha

bani'aadamnimada (clusters) ee Soomaaliya, inta badan hay'adaha bani'aadamnimadu ma helin sadex meelood ooh al dhaqaalihii ay dalbadeen. Gaar ahaan dhaqaala yaridu waxay taabatay qeybaha (clusters) kala ah CCCM, waxbarashadam iyo qaybaha ka shaqeeya ka hortagga xadgudubyada iyo hoyga. Adeegyada ay bixiyaan qaybahaani waxay muhiimad gaar ah u leeyihiin dadka nugul maadaama ay ka taakuleeyaan sidii aan loogu xadgudbi lahayn. Qeybaha caafimaadka, nafaqaynta caruurta iyo WASH-ka oo aan helin deeqo ay mashaariicdooda ku fuliyaan waxay kalliftay in lacag loo wayao sidii loo xakamayn lahaa qaar kamid ah cudurrada faafa iyo sidii loo heli lahaa biyo nadiif ah. Farqigan u dhexeeya deeqaha ay heleen qaybaha kala duwan wuxuu siyaabo kala duwan u saameeyay gobollada kala duwan ee dalka.

Weli baahiyo badan ayaa jira gaar ahaan weliba dadka gudaha ku barakacsan dadka bulshada laga heyb-sooco, dadkan nugul mar walba waxay u baahanyihiin gurmada naf badbaadin ah. Dadka ku nool meelaha ay fogfog oo ay maamulaan kooxaha dowladda ka soo horjeeda waxaa adag in gurmada bani'aadamnimo la gaarsiyo.

Sanduuqa SHF \$18.6 milyan si sara loogu qaado gurmada naf badbaadiska

Sanduuqa Bani'aadamnimada ee Soomaaliya SHF ayaa sii daayay qoondadii labaad ee lagu taageerayo baahiyaha bani'aadamnimada ee degdegga ah iyo meelaha ay ka jirto xaalad ay tahay in mudnaan la siiyo. Lacagtan (18.6 milyan) waxaa waxaa loogu talo galay meelo kala duwan oo dalka ka mid ah in la gaarsiyo oo ay ku jiraan meelaha ay ku badanyihiin barakacayaasha ee Baydhabo, Muqdisho, Bossaso iyo Hargeysa. Dadka reer miyiga ah eek u nool gobollada Awdal, Bay, Gedo, Shabeellaha Dhexe iyo Shabeellaha Hoose ayagana waxay ka mid yihiin dadka qoondada ku jira.

Lacagtan waxay qayb weyn ka qaadanaysaa gurmada la doonayo in lugula tacaalo nafaqa darrada caruurta adeegna lagu siiyo barakacayaasha. Sidaas daraadeed 40% oo ka mid lacagtan waxaa lagu taageeri doonaa caafimaadka, nafaqeynta, adeegyada fayadhowrka gaar ahaan meelaha laga soo sheegay nafaqa darrada baahsan. Ilaa 5,000 oo caruur ah ayaa la filayaa inay ka faa'iideysato adeegyada la xiriira waxbarashada aasaasiga ah iyo kuwa lugula tacaalayo xadgudubyada.

Deeqdan barkeed wuxuu aadayaa qeybaha (clusters) aan helin deeqo ay ku socodsiiyaan mashaariicdooda iyo weliba meelaha aysan inta badan gaarin adeegyada bani'aadamnimada duruufaha amniga darteed ama kaabayaasha oo liita awgood. Mashaariicdan iyo meelaha loo xushay in laga fuliyaba si taxadar leh ayaa looga fekeray waxaana lugu saleeyay in wax loogu qabto xoolo dhaqatada ay dhaafeen xoolahooda abaaraha awgood ee wajahaya cunta yarida, lagu dayactiro habdhisayada fayadhowrka iyo biiyaha, sara loogu qaado la tacaalidda nafaqadarrada, lagu taageero caafimaadka aasaasiga ah laguna yareeyo barakicinta khasabka ah. I milyan oo doolar waxaa lagu bixi doonaa adeegyada lagu fududeeyo mashaariicda sida duulimaadyada UNHAS oo kale.

Half of the SHF 2018 second standard allocation funds will support priority cluster-specific activities and ensure programme continuity in the underserved and hard-to-reach locations.

Kaalmada sanduuqa SHF aad ayay u yartahay marka la eego baahiyaha jira iyo dhulka ay tahay in laga howl galo intaba. Deeqo soo degdeg ah oo lugu taageeraayo Qorshaha ka falcelinta baahiyaha bani'aadamnimada ayaa loo baahanyahay si hay'adaha samafalku ay u sii wedi karoodaan dadaallada naf badbaadiska ah iyo mashaariicda soo kabashada. Baahi weyn ayaa loo qabaa deeqaha bani'aadamnimada gaar ahaan waqtigan oo xilli roobaadka Deyrta uusan si wanaagsan uga di'in gobollada dalka.

For further information, please contact:

Tapiwa Gomo, Head of Communication, gomo@un.org, Tel. +252 616 548 007. Antonette Miday, Public Information Officer, miday@un.org, Tel. +252 61915046. Mursal Ali Ahmed | Public Information Analyst, mursalali@un.org, Tel: +252619150457/ 252615679998. Ause Abdelhaq | Communication Assistant, ause@un.org, Tel: 254 715743354. OCHA humanitarian bulletins are available at www.unocha.org/somalia | www.unocha.org | www.reliefweb.int